


**SOMALI DIASPORA
FORUM IN THE WORLD**



نادي المغتربين
الصوماليين في العام



Ref : 26
Date:27/06/06

الرقم:
التاريخ:

Xukun dhaawac ku ah dhaqanka soomaaliyeed

Waxay baahiyeen qalabka warbaahintu in maxkamad ku taala dadlka Sweden ee Magaalada gothenburg ay ku riday xukun ciqaab ah nin asalkiisu soomaali ahaa oo reer Sweden oo lagu magacaabo Cali Cilmi Xaayoow ah waxaana lagu xukumay 4sano oo xarig ah iyo \$ 46 000 oo mag dhaw ah waxaa lagu eedeeyay dambi ah inuu gabadhiisa ku guday gudniin fircooni ah sanaddkii 2001

Hadii arrinkui sidaa u dhacay Waxaa jira dhowr arrimood oo dhacdada iyo xujada loo cuskadayba mugdi galinaaya waana kuwan:

- 1- Dhaqanka soomaalida kama suurowdo in aabe gabadhiisa oo la gudaayo uu gacanta qabto amaba uu joogo meesha lagu gudaayo.
- 2- Shaqada gudniinka waxaa iska leh Hooyada aabahana inta badan ma ogolaado ama waa laga qariyaaba marka waa arrin hooyo wadato oon shaqo aabo ahayn.
- 3- Hadiiba aabaha iyo hooyaduba ay fal dambiyeedka wada faleen maxaa loo kala soocay oo xukunka loogu wada ridi waayay.
- 4- Hadii dhacdadu dhacday 2001 dacwadana la keenay 2006 mudadaa shanta sano ah sababta loo keeni waayay waxay abuuraysaa shaki inay jiraan arrimo kale ooo la isku haysto gudniinkana loogu marmarsoonaayo in lagu xumeeyo aabaha.
- 5- Midda ku saabsan sakiinta garka lagu xiirto lagu jarjaray xubinta taranka ma dhici karto sababtoo ah aabo iyo hooyo wada jooga gabadhooda uma ogolaanayaan in saa loo silciyo dadka ka shaqeeya arrimaha gudniinkana waa farsamo yaqaano qalabkooda wato oo ay ku shaqaystaan.

- 6- Dadka aad ugu dhagan caadadaas ee laga hor joogsaday waxay sameeyaan fal loo yaqaano gudniin sunni ah kaasoo ay sameeyaan dhaqtaradda la yaqaano waxaanu ku kooban yahay in xubinta taranka la saro oo dhiig yari ka soo daato kaasoo isga laftiisa dagaal lagu hayo.

Codsi:

Sida xaqiiqada ah markii laga maqlay magaala madaxda soomaaliya ee muqdisho aad ayaa looga yaqyaqsooday waxana loo fahmay in dhacdadan loola jeedo ceebayn lagu ceebeenayo dhaqanada soomaalida maxaa yeelay lama rumayn karo in arrinkaaso ka dhaco magaalo madaxda muqdisho, marka waxaan codsanaynaa in qareenada arrinkan dhinaca ka ah ay rafcaan ka qaataan dhacdadana si dhab ah loo baaro lagana jawaabo daldalooladan aan kor ku xusnay sida dib u dhaca dacwadan, maqnaanshaha kaalinta hooyadu ku leedahay, iyo suuro galnimada in aabo qabadhiisa oo la qalayo daawado taasoo anshaxa iyo xishoodka iyo dhaqanka islaamkaba ku fool xun, waxaana la warsan karaa dadka xog ogaalka u ah dhaqanka soomaaliyeed ee ku nool dalkaas oo rag iyo haweenba leh.

Guddoomiyaha SODIF
Adv. C/raxmaan Xuseen (Abu-Xamza)

Somali Diaspora Forum (SODEF) - Tel: 00252-1-858256, Mob. 00252-1-519890
e-mail: odawa40@hotmail.com Mogadishu - Somalia

<http://www.somalitalk.com/2006/jun/maanta9.html>

Aabe Soomaaliyeed ee lugu eedayey in gabadhiisa guday ayaa afar sanno oo ah xarig ah lugu xukumay